

BADBAADADA IYO FAA'IIDOOYINKA

Heshiiskani wuxuu ka hadlayaa iPad-ka la amaahiyay ilmahaaga hadii dhaawac soo gaaro ama uu lumo. Caymiska waa 24 saac maalintii. Qiimaha guud waxaa la go'aaminayaa marka uu lumo ama dhaawac soo gaaro. Ma jiro wax qiimo ah oo ka badan \$ 300.00. Haddii ay dhacdo in uu dhaawac ama dhumo, caymiskani wuxuu bixin doonaa 85% (illaa \$ 255.00) wixii dhaawac ama khasaara soo gaara. Adiga ayaa mas'uul ka ah 15% (illaa \$ 45.00) dhaawaca ama khasaaraha soo gaara. Maamulka Dugsiyada Dadwaynaha ee Lexington waxay xaq u leeyihiin inay ka noqdaan iPad-ka ardayga si xun u isticmaalka ama xadgudubka wakhti kasta.

GOORTA UU BILABANAYO iyo TAARIIKHDA DHICITAANKA

Ceymiskaasi wuxuu ka bilaabanayaa taariikhda codsiyada iPad-ka iyo lacag-bixinta lacagta caymiska la helo dugsiga iyada oo loo marayo taariikhda iPadka laga codsado in lagu soo celiyo dugsiga, iyada oo si wanaagsan loo shaqeynayo, dhamaadka sanad dugsiyeedka ama marka ardaygu wuxuu ka tagayaa degmada.

Kharashka caymiska

Qiimaha guud ee caymiska waa \$ 25.00 sanadkiiba. Caymiska hadii uu kuu bilaawdo semestarka dhexdiisa lacag laguuma soo celinayo.

Waxaa la isku raacay oo la fahmay in:

- ◆ Dugsiyada Dadweynaha ee Lexington waxay bixin doonaan caymiska dhammaan ardayda. Ciwaanku waa mid ikhtiyaari ah.
- ◆ Arji gooni ah waa in loo buuxiyo arday kasta si uu caymis u gashto iPad-kiisa.

Buuxi macluumaadka soo socda. Ku soo celi foomkan iyo lacag ta xafiiska dugsiga ilmahaagu dhigto.

Foomkan waa in la buuxiyaa oo la calaamadeeyaa HAA ka hor inta aan loo ogolaan in iPad ka baxo guriga.

TAARIIKHDA _____ FASALKA _____ LAMBARKA ARDAYGA _____

MAGACA ARDAYGA _____

CINWAANKA GURIGA _____

(Wadada, Magaalada iyo Zip-ka)

<div style="text-align: center; margin-bottom: 20px;"> <input style="width: 50px; height: 50px; border: 1px solid black;" type="checkbox"/> HAA </div> <p>Waxaan jeclaan lahaa in aan ka qayb qaato barnaamijka Caymiska dhumida iyo dhaawaca. Ilmahayga iyo aniga waan aqrisanay waxaan isku raacnay shuruudaha Buug-gacmeedka Laptop-ka Ardayga iyo Waalidka.</p>	<div style="text-align: center; margin-bottom: 20px;"> <input style="width: 50px; height: 50px; border: 1px solid black;" type="checkbox"/> MAYA </div> <p>Madoonayo caymiskani waqti xaadirani. Waan fahamsanahay in ilmahayga aan loo oggolaan doonin inuu guriga iPad-ka usoo qaato waxaan mas'uul ka ahay 100% wixii waxyeelo ama khasaaro ah ee soo gaara iPad-ka uu iskuulka ilmahayga amaahiyay inta uu iskuulka joogo.</p>
Taariikhda	Taariikhda
Qor Magaca Waalidka:	Saxiixa waalidka: